



Kadib Moderna-ka tallaalkaaga COVID-19

Waad ku mahadsan tahay sida aad naftaada iyo dadka kaleba uga ilaalisay qaadashada tallaalka. Hadda oo aad qaadatay tallaalkaaga, waxaan kaa codsaneynaa inaad si taxaddar leh u akhrido dokumentigan, si aad u ogaatid sida aad filan karto inaad dareento maalmaha soo socda iyo halka aad ka heli karto macluumaad dheeraad ah.

Akhriso bug yaraha macluumaadka tallaalka COVID-19 ee aan kaa siinnay tallaalka sidoo kale.

Waxaan sidoo kale ku siinaynaa diiwaanka tallaalkaaga maanta.

Fadlan xafid kaarka diiwaanka.

Maxaa dhici kara maalmaha soo socda?

Dadka qaar ee qaatay tallaalka aad maanta qaadatay ayaa dareemi karo sidan:

- Ay yeelato jilicsanaan, barar, casaan ama cuncun gacanta ay ku mudeen tallaalka
- Daal dareento
- Madax xanuun kugu dhaco
- Qanjidhada oo bararay gacanta hoosteeda meeshii laga muday
- Murqo xanuun
- Lafa xanuun
- Lallabbo ama matagid
- Qandho ama Matag (heerka qandhada 38 darajo Celsius ama ka sareeya).

Sida tallaalada oo dhan, waxaad ugu wargalin kartaa Hay'adda Nidaaminta Alaabada Caafimaadka (HPRA). Si aad uga warbixiso waxyeellooyinka tallaalka COVID-19, fadlan booqo www.hpra.ie/report

Ka waran haddii aan qandho leeyahay ama xanuun leeyahay?

Haddii aad qandho leedahay ama xanuun ku hayo, waxaad qaadan kartaa paracetamol ama ibuprofen si lagu caawiyo. Si kastaba ha noqotee, haddii qandhadaadu ay socoto in ka badan 48 saacadood ama haddii aad weli walaacsan tahay, fadlan raadi talo caafimaad. Ha u qaadan ibuprofen haddii aad uur leedahay

Ma u baahanahay inaan wax sameeyo ka hor intaan helin talaalkaaga labaad? Markaad qaadnaysid talaalkaaga xiga iyo tan ugu dambeysa, fadlan u sheeg kooxda tallaalka haddii ay jiraan wax isbeddelo ah oo ku saabsan taariikhdaada caafimaad.

Soo qaado kaarkaaga diiwaanka tallaalka markii aad qaadnayso talaalkaaga labaad
Tani waxay noqon doontaa 28 maalmood gudahood (afar toddobaad).

Warka wanaagsan

Qaadashada tallaalka COVID-19 waa inuu kaa ilaaliyaa dhibaatooyinka halista ah ee COVID-19.

Talaalku wuxuu baraa habka difaaca jirka si uu kaaga difaaco cudurada. Aad ayey uga badbaado badan tahay habkaaga difaaca jirka inuu tan ku barto tallaal marka loo eego qaadashada COVID-19.

Weli waxaan baraneynaa

Waxay qaadataa 14 maalmood ka dib qaadashada dawada labaad si ay u shaqeyso.

Waxaa jirta fursad yar oo aad weli ku heli karto COVID-19 xitaa haddii aad tallaasho. Ma ogin weli haddii tallaalka la uu kaa joojinayo inaad fayraska u gudbiso kuwa kale, sidaa darteed waa inaad sii waddo inaad raacdo talooyinka caafimaadka bulshada:

- Raac tilmaamaha kala fogaynta bulshada
(ka fogoow laba mitir kuwa kale meesha ay suurogal tahay)
- Xirro maskarada wajiga
- Gacmahaaga si joogto ah u dhaq

Su'aal ma qabtaa?

Haddii aadan hubin wax uun, ama aad wax su'aalo ah ka qabtid tallaalka COVID-19 fadlan weydii tallaalkaaga maanta.

Booqo www.hse.ie/covid19vaccine si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka COVID-19

Dhibaatooyinka ay keento

Fadlan ku soo wargeli wixii ku soo kordha HPRA ee ah www.hpra.ie/report

Published by HSE on 2nd February 2021.
Version 2.



Rialtas na hÉireann
Government of Ireland